



Balaadhinta West Seattle Link

Tareenka fudud ee Link

Balaadhinta West Seattle Link


- Ikhtiyaarka kale ee la doorbidayo
- Ikhtiyaarka EIS ee Kale ee Kama Danbaysta ah

Xogta dhabada

- Dhabada kor loo qaaday
- Dhabada birij hoosaadka
- Dhabada dusha ah

Adeega tareenka fudud ee wakhtigan iyo mustaqbalka

Goobaha istaanka



WAJIGA HADDA

Qorsheynta: Dib u eegista bii'ada

Maarso 2023: Qariiraadaan waxay muujinaysaa marinnada iyo goobaha boosteejada lagu samaynaayo daraasada kuwaas oo qayb ka ah dib u eegista socota ee bii'ada oo ay aqoonsadeen Gudiga Sound Transit. Wadooyinka iyo goobaha boosteejooyinka ayaa lagu samayn karaa dib u habayn ayadoo lagu saleynaayo hawlaha socda ee qorsheynta iyo naqshada. Gudiga Sound Transit ayaa aqoonsaday qaabka kale ee la door bidaayo ee Balaadhinta West Seattle Link bishii Luuliyo 2022.

Balaarinta light rail si loo gaarsiiyo West Seattle

Faahfaahin ku saabsan mashruuca

Balaadhinta West Seattle Link ayaa bixinaaya socdaalka degdega ah, ee la isku halayn karo ee wadada tareenka ee tagaysa deegaannada dadka badan iyo xarumaha shaqada ee ku yaala xaafadaha SODO, Delridge, iyo West Seattle. Balaadhinta West Seattle Link waa qayb kamid ah balaarinta nidaamka gaadiidka ee gobalka oo ay u codeeyeen codbixiyaashu bishii Nufeembar 2016.



Xog badan ogoow, isku duwaan geli wararka iimeelka, oo hel qaab aad uga qaybgasho:

soundtransit.org/wslink

Wakhtiga mashruuca





Rakaabka Link ayaa sugi doona imaatinka tareenka Boosteejada Mount Baker.

Faa'idooyinka mashruuca

- **Wuxuu ku kordhinayaa 4.1 oo mayl wadada adeegga tareenka ee ka baxda SODO ee tagta xaafada Alaska Junction ee West Seattle.**
- **Waxaa ku jira afar boosteejo oo cusub oo u dhexeeya SODO iyo Alaska Junction.**

Waa maxay talaabada xigta ee Wadada West Seattle?

Mashruuca ayaa gaari doona Bayaanka Kama danbaysta ah ee Saamaynta Bii'ada (EIS), kaasoo la filayo in la daabaco 2024. Adeegga waxaa loo mudeeyay inuu biloowdo 2032.

Doorkaaga qaado

Sound Transit waxay u taagan tahay ka qaybgelinta macnaha leh ee dadwaynaha. Waxaan bixinaa fursadaha fikir uruurinta tooska ah iyo kuwa oonlaynka ah si aan u daboolno baahiyaha bulshada. La xirii haddii aad qabto su'aalo, fikrado, ama si aad u codsato xog siinta kooxdaada bulshada.

Sinaan iyo wadajir

Waxaan sidoo kale u taagan nahay inaan si wadajir ah fikir uga uruurino bulshooyinka awal laga sadbursan jiray. Haddii aad xiiseynayso inaad xog dheeri ah ka ogaato mashruucaan iyo sida uu u saamaynaayo bulshadaada, fadlan nala soo xiriiir waxaana kaala shaqeyn doonaa helista cid kugu haboon oo aad ka hesho xogta mashruuca.

Su'aalo?

La xiriiir Kooxda Wada Shaqeynta Bulshada:
westseattlelink@soundtransit.org ama wac
206-903-7229.

401 S. Jackson St., Seattle, WA 98104 | main@soundtransit.org
soundtransit.org | 888-889-6368/TTY: 711 | Si aad ugu dalbato macluumaadka qaab kale, la hadal 800-201-4900/TTY: 711 ama iimeel u dir accessibility@soundtransit.org.

Sidee ayaan halkaan ku soo gaarnay?

Laga soo bilaabo 2017-2019, shaqaalaha mashruuca ayaa sameeyay hanaanka kaladuwan ee hormarinta oo balaaran kaasoo keenay in Gudiga Sound Transit ay aqoonsadaan dookhyo kale oo haboon iyo qaabab kale oo ay daraasad ku sameeyaan Qabyo qoraalka EIS.

Balaadhinta West Seattle Link iyo Ballard ayaa si wadajir ah loogu qiimeeyay Qabyo qoraalka EIS ee la daabacay Janaayo 2022. Mudada uruurinta fikradaha dadwaynaha ayaa socotay 90 maalmood intii u dhexaysay Janaayo iyo Abriil 2022. Kadib dib u eegista Qabyo qoraalka EIS iyo fikradaha Qabiillada, iskaashatada dadwaynaha iyo wakaalada, Gudiga Sound Transit ayaa aqoonsaday dookh kale oo la doorbidaayo ee Balaadhinta West Seattle Link (WSLE) bishii Luuliyo 2022. Kadib dib u eegis dheeri ah oo lagu sameeyay bii'ada taasoo loogu baahday dib u habaynada Balaadhinta Isku Xidhka Ballard (BLE) taasoo ka dhalatay talaabada Gudiga Sound Transit bishii Maarso 2023, dib u eegista bii'ada ee mashruucyada WSLE iyo BLE ayaa ku socda jadwallo kaladuwan.

Qorshaha boosteejada

Qorsheynta boosteejada waxaa ku jira qiimeynta dookhyada kale ee qaababka kaladuwan ee ku saleysan fikirka xaafada, ayna ku jiraan sida dadku ku tagayaan boosteejada iyo qaababka aan safaradaan uga dhigi karno kuwa amaan ah oo qanaaco leh. Waxaan sidoo kale eegaynaa fursadaha abuurista guryo, aaga xafiisyada, dukaanno, goobaha dadwaynaha u furan, anagoo tixgelinayna waxa aan ka maqalnay xubnaha ee ku saabsan baahiyahooda iyo damacyadooda. Fikirka dadwaynaha ee ku aadan boosteejooyinka ayaa naga caawinaaya faahfaahinta naqshada socota ee boosteejada.



Turjubaan 800-823-9230

Español 漢語 한국어 日本語
Tagalog русский язык Tiếng Việt

Nagu
xidhnoow:



SOUNDTRANSIT